

Xaashida Xaqiiqda ee Tallaalka Monkeypox

Monkeypox

Monkeypox waa fayras keena qandho, madax-xanuun, qanjirrada oo barara iyo daal, oo ay daba socdaan finan iyo nabarro ka soo baxa maqaarka. Caadi ahaan wuxuu ku faafaa xiriir aad u dhow oo lala yeesho qof qaba cudurka Monkeypox.

Dulmarka Tallaalka

Tallaalka® Imvamune:

- Waxaa laga oggolaaday Canada si la isagaga ilaaliyo Monkeypox.
- Waa ammaan wana waxtar
- Waxa la isticmaali karaa ka hor inta aan la qaadin fayraska (kahortagga-soo-gaadhista - PrEP) ama 14 maalmood gudahood ka dib marka la soo bandhigo (ka-hortagga-soo-gaadhista- PEP).
- Waxaa la siin karaa qof hore u qaatay tallaalka furuqa.
- Waxaa lagu duraa lakabka baruurta ee ka korreeya muruqa ee cududda.
- Jirka kagama tago nabarro sida noocii hore ee tallaalka furuqa.
- Wuxuu barayaa habkaaga difaaca inuu aqoonsado oo uu la dagaallamo fayraska Monkeypox.
- Waxay qaadataa laba toddobaad tallaalka ka dib inuu ku siiyo difaac.
- Waxa ku jira fayras la beddelay oo kuguma ridi karo jirro.

Tallaalku waa lacag la'aan weyna heli karaan dadka xaqa u lihi. Uma baahnid aqoonsi ID ama Kaar Caafimaad OHIP.

U-qalmitaanka Tallaalka

Iyada oo ku saleysan tilmaamaha Wasaaradda Caafimaadka ee Ontaariyo, hal qiyaas oo tallaalka ah ayaa la siinayaa kooxaha soo socda ee xaqa u leh:

- Kahortagga Soo-gaadhista (PrEP):
 - a) Labo ruuxle, aan isu aqoonsanayn lab buuxa ama dheddig buuxa midna, rag isbeddelay iyo dumar beddelay ama shakhsiyaad lab ama dheddig midkii ay u dhasheen isu aqoonsan ama leh lammaane galmo kuwaas oo isu aqoonsaday inay ka tirsan yihiin khaniisyada, labada jinsiba iyo ragga kale ee la galmooda ragga (gbMSM) ee bulshada IYO ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:
 - Qaaday caabuqa galmada lagu kala qaado (STI) 2dii bilood ee la soo dhaafay, sida kalamiidiya, jabtada, ama waraabowga;
 - Dhowaan lahaa 2 ama in ka badan oo lammaane galmo ah amaba laga yaabo inay qorsheynayaan;
 - Dhowaan ka soo qayb galay qol qubeys wadareed, naadi galmo ama meel la mid ah oo galmo la iskula xiriiro ama laga yaabo inay qorsheynayaan, ama ka shaqeeya/ tabaruc ugu shaqeeya goobahan;
 - Dhawaan yeeshay galmo qarsoodi ah/mid aan caadi ahayn ama laga yaabo in ay qorshaynayaan, oo ay ku jiraan isticmaalka shukaansiga onlineka ama apps hookup;
 - Ah xiriirka galmo ee shaqsi ku lug leh ganacsiga galmada.
 - b) Shakhsiyaadka ku jira ganacsiga galmada ama laga yaabo inay qorsheynayaan.

- c) Shakhsiyaadka ka tirsan qoyska ama lammaanaha galmoodka ee shakhsiyaadka buuxiya shuruudaha kor ku xusan IYO kuwan midkood a) si dhexdhexaad ah ama si daran isu difaacay AMA b) uur leh waxay heli karaan PrEP ka dib markay la tashadaan bixiyahooda daryeel caafimaad.
- Kahortagga Soo-gaadhista Kadib (PEP):
 - Dadka la ogyahay inay soo-qaadeen /xiriir dhow lala yeesho qof qaba cudurka Monkeypox waa inay qaataan tallaalka PEP ahaan 4 maalmood gudahood, laakiin waxay qaadan karaan ilaa 14 maalmood ka dib soo-gaadhista ugu dambeysa.

La xiriir bixiyahaaga daryeel caafimaad ama Caafimaadka Dadweynaha Toronto si aad u ogaato inaad u qalantid PrEP ama PEP.

Waxyeellooyin iyo khataro

Sida tallaalada kale, tallaalkani waxa uu keeni karaa waxyeellooyin qaar. Badankoodu waa kuwo khafiif ah ama dhexdhexaad ah, waxayna ku baxaan iskood 7 maalmood gudahood. Dhibaatooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah:

- Guduudasho, xanuun ama barar goobta la duray
- dareen daal
- Madax xanuun
- Muruq xanuun
- Lallabo

La xiriir bixiye daryeel caafimaad ama u tag waaxda xaaladaha degdega ah ee kuugu dhow haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadahan ka dib qaadashada tallaalka:

- cuncun
- Barar wejiga ama afka
- Neefsashada oo dhib kugu haysa ama neefta oo kugu yaraata
- Xabad xanuun ama wadne garaac

La hadal Bixiye Daryeel Caafimaad ka hor inta aanad is tallaalin haddii aad:

- Xasaasiyad ka qaadid mid ka mid ah maaddooyinka [tallaalka](#) oo ay ku jiraan: Tris/tromethamine, bromobutyl, benzonase, chicken protein, egg, gentamicin and ciprofloxacin.
- Aad Falcelin halis ah kala kulantay nooc kale oo tallaalka furuqa/Monkeypox.
- Aad qaadanaysid tallaalka Imvamune in ka yar 4 toddobaad ka hor ama kadib tallaalka kale.
- Aad ka yartay 18 jir.
- Aad uur leedahay ama aad naas nuujinaysid.
- Aad leedahay habdhis difaac oo daciif ah (ay ku jirto tallaalka xubin ama HIV oo leh tiro CD4 hoose/aan la garanayn).

Sug si aad u hesho tallaalka haddii aad leedahay astaamo COVID-19, iyo/ama lagaa rabo inaad gooni isu-go'moomisid.

Haddii aad u maleyneysid inaad qabtid Monkepox, waa muhiim inaad isla markiiba is go'doomisid oo aad la xiriirto bixiye daryeel caafimaad. Waqtigan xaadirka ah, dadka qaba ama uu ku dhacay Monkeypox xaq uma laha tallaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah: La hadal bixiye daryeel caafimaad ama booqo toronto.ca/Monkeypox